



Xuquuqda caawinaadeed ee Qofka Magangalyo doonka ah

Waxa aad tahay Qof soo qaxay, oo hadana waqti dheerna deggan Wadanka Jarmalka – laakinse aan aqoonsi helinin.

Waxaa aad qaadataa Lacagta caawinaadda Sooshalka – Laakinse wax aad qaadataa Lacag ka yar midda ay qaataan Qaxootinimada loo aqoonsaday? Qoys miyaad ka aasaasatay Wadanka Jarmalka, kolkaas dabadeedna Carruurtaadu Bilo ma aysan qaadanin wax caawinaad ah. Ma waxaa lagu siiyaa Lacag „Boket Money“ keliya ah, maadaama la doonayo in laguugu khasbo in aad Adiga oo raalli ah aad iska baxdo?

Haddii ay arrimahaas kore ay jiraan, waxbaa khaldan.

Waxa aan doonaynaa in aad heshaan caawinadda aad xaqqa u leedihiin.

Waayo Waddankaagii ayaad ka soo carartay, maadaama Wadankaaga aysan ka jirinin wax sharci ah. Wadanka Jarmalkuna waa in uu ahaadaa mid Wadankaaga ka duwan.

Waxa aan nahay Dumar iyo Rag Abuukaatayaal ah oo isku jira, oo ah kuwa ku takhasusay xuquuqda caawinaadda. Waxa aan ka shaqaynaa Wadanka Federaalka Jarmalka ah oo dhan – sidaasi darteed waa isugu kaaya mid meel walba oo aad Adigu deggan tahay.

Wax ballan ah nooga baahnid Annaga, ee waa in aad habka Elaktaroonikada ah (sida E- Mail, WhatsApp, iyo kuwa kale ee la midka ah) aad noogu soo dirtaa Warqadda ay ku taalo Caawinaadda ee aad ka qaadato Sozialamt ama Sooshalka keliya. Kolkaas dabadeed ayaan waxaa aan kuu suurogelinaynaa in aad heshid Lacagta aad xaqqa u leedahay in aad qaadato ama aad xaqqa u leedihiin in aad qaadataan.

Wax Riisiko ah ama Khatar ah ee arrintaas kuugu jirta ma jirto. Taasina wax khasaaro ama wax dhib ah uma keeni karto ogolaashada degenaashadaada ee Wadanka, ee waxaa keliya ee aad dalbanaysaa waa wax aad sharci ahaan aad xaq u leedahay.

Sidoo kalana ma jirto wax Lacag ah ee aad nagu siinayso hawsha aan kuu qabanayno, maadaama aan Annagu sida uu qabo sharciga caawinaddu aan

kharajkeena u dalban karno sida uu qabo sharciga caawinadda kharajka dacwadaha.

Uma baahna dhiifoonaan badan – Na soo wac ooTelefoon noo soo dir ama noogu soo dir qoraal habka Elaktaroonikada ah (Tusaale ahaan: Email, WhatsApp iyo noocyada kale ee suurogalka ah.)

Nagala soo xiriir ama Bogga Internetka: <https://zusammenland.de/case-study/mit-recht-zum-recht/>